Oregon Health Authority

QAYBTA CAAFIMAADKA DADWEYNAHA

Su'aalaha aalaaba la isweydiiyo ee ku saabsan tallaalka COVID-19 ee Oregon

(*La cusboonaysiiyay 3-22-2021*)

Guud ahaan

S1: Sababtee u qaataa tallaalka COVID-19?

J1: Is-tallaalida waa hab badqab ah, wax-ku-ool ah oo la isku halleyn karo oo looga hortago inu kugu dhaco cudurka COVID-19. Waa habka ugu fiican ee naga caawin karo inuu ka dhammaado safmareenka COVID-19 gudaha Oregon. Marka tallaalka aan qaadanno, aan xirano maaskarooyinka, dhaqano gacmahayaga, ilaalino kala fogaanshaha jireed iyo ka fogaanshaha isu-imaatinada waaweyn ee gudaha waxaan gacan ka geysan karnaa joojinta faafida. Haddii inteena badan aan is tallaalno, waxaan ku guuleysan karnaa habdhiska difaaca jireed ee bulshada oo fayrasku si dhakhso ah uma faafi doono.

S2: Sidee ayuu u shaqeeyaa tallaalka COVID-19?

J2: Tallaalada Pfizer iyo Moderna waa tallaalo gudbiya RNA, ama mRNA. Tallaalada mRNA waxay unugyadayada siiyaan tilmaamaha sida loo sameeyo borotiin aan waxyeello lahayn oo u gaar ah fayraska. Tallaalka J&J waa la mid, balse halkii daawada lagu gudbin lahaa aburka weyn, waxay adeegsataa qolof aan waxyeello lahayn oo fayras qabow ah si loo gaarsiiyo daawada unugyadayada. Jirkayaga ayaa aqoonsada in borotiinku ahayn inuusan jirku ku jirin wuxuuna dhisaa T-lymphocytes iyo B-lymphocytes (unugyada dhiiga cad) oo xusuusan doonaan sida loola dagaallamo fayraska keena COVID-19 haddii aan mustaqbalka qaadno. CDC ayaa haysa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida tallaalada mRNA u shaqeeyaan.

S3: Tallaalka COVID-19 ma badqab baa?

J3: Tallaalku waa habka ugu badqabka badan, ugu wax-ku-oolka badan laguna kalsoonaan karo si naftaada, qoyskaaga iyo bulshadaada caafimaadqab iyo badqab uga ahaato COVID-19. Tallaallada COVID-19 ayaa waxtar leh 95% waxayna soo mareen baaritaanno nabadgelyo oo adag. Mahad ha ka gaarto horumarka laga sameeyay dhanka caafimaadka, saynisyahannadu waxay awood u yeesheen inay u sameeyaan oo u tijaabiyaan tallaalka si dhakhso leh. Maamulka Cuntada & Daawada (FDA) waxay u baahan yihiin tijaabinta badqabka oo adag ka hor inta aysan ansixinin wax tallaal ah. Tobanaan kun oo dad ah — oo ay ku jiraan

Reer Oregon — oo kala leh asalo badan iyo da' kala duwan, iyo bulshooyinka midabka leh, ayaa kaqeybqaatay tijaabinta tallaalka.

S4: Tallaalku ma yahay badqab haddii aan falcelin xun ka qaaday tallaalka hargabka? Ka waran haddii dhakhtarkaygu ii sheegay inaan mar kale qaadan tallaal hargab? Ka waran haddii aan fal-celin xun kugu yeelato qiyaasta ugu horreysa ee tallaalka COVID-19?

J4: Waa inaad kala hadashaa dhakhtarkaaga xaaladaada gaarka ah. Ogeysii taariikh kasta oo xasaasiyadeed ama ka falcelinta tallaallada ama irbadaha.

CDC waxay kugula talineysaa INAADAN qaadan qiyaasta tallaalka COVID-19 haddii aad horay u qaadatay:

- Falcelinta xasaasiyadeed ee daran (sida xasaasiyadda) kadib qadarta tallaalkaaga ugu horreeya ee COVID-19.
- Falcelin kasta oo xasaasiyadeed oo daran ee ka dhalatay qiyaastii hore ee tallaalka COVID-19, ama mid ka mid ah waxyaabaha ay ka kooban tahay (oo ay ku jiraan calool-jilciye).
- Falcelin kasta oo xasaasiyadeed oo dhaqso ah oo xumbo-dejiyeyaasha.
- Haddii aad leedahay taariikh falcelin xasaasiyadeed oo degdeg ah nooc kasta ha noqotee aad ka qaado tallaal kasta, irbad, cunto, daawo ama sunta cayayaanka, ama haddii aad leedahay taariikh xasaasiyad, waa in lagula socdaa 30 daqiiqo kadib qaadashada tallaalkaaga COVID-19.

Wixii macluumaad dheeraad ah, booqo https://www.cdc.gov/vaccines/covid-19/info-by-product/clinical-considerations.html#Appendix-A

S5: Maxaa loola jeedaa Oggolaanshaha U Isticmaalka Xaalada degdega ah (EUA)?

J5: Waqtiyada ay jiraan xaaladaha degdega ah ee caafimaadka bulshada, sida safmareenka, FDA waxay oggolaataa isticmaalka daawooyinka iyo daaweyno nafta badbaadiya qaarkood iyadoo loo marayo Oggolaanshaha U Isticmaalka Xaalada Degdega ah (EUA. Tallaalka COVID-19 waxaa lagu tijaabiyay tobanaan kun oo kaqaybgalayaasha daraasad, taasoo soo saartay xog ku filan oo lagu qanciyo FDA inuu tallaalku yahay mid ammaan ah oo wax-ku-ool ah, soo-saarahana wuxuu buuxiyay dhammaan heerarka badqabka.

S6: Sidee ugu dhakhsaha badan ayay tallaaladu wax-ku-ool u yihiin?

J6: Tallaallada oo dhan waxaa loo tixgeliyaa inay wax-ku-ool noqdaan laba toddobaad kadib markaad heshay tallaalka isxigxiga oo dhammeystiran (1 qiyaas oo tallaalka J & J; 2 qiyaas oo tallaalka Pfizer ama Moderna).

Waxaad heli doontaa waxoogaa difaac ah sida ugu dhakhsaha badan, balse wixii kahortag buuxa ah, sug labo toddobaad oo buuxa.

S7: Ma loo heli doonaa tallaalka COVID-19 qof walba?

J7: Tallaalku wuu yaraan karaa marka hore, sidaas darteed qeeybin ayaa mudnaan la siin doonaa. Balse marka soosaarista tallaalka COVID-19 kor u kaco, ugu dambayntii waxaa jiri doona tallaal loo heli doono qof walba. Muddayntani waxay ku xiran tahay inta tallaal ee la ansixiyay iyo wadarta guud ee tashiilaadka la heli karo iyadoo loo marayo soo-saareyaasha. Waxaan rajeyneynaa marka la gaaro xagaaga 2021, qof kasta oo raba tallaalka COVID-19 inuu mid heli karo.

S8: Sidee Oregon u hubin doontaa in si xaqsoor leh loo qeybiyo tallaalka?

A8: Maadaama tallaalka COVID-19 noqonayo mid la heli karo, Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA) wuxuu hubin doonaa in hannaanka qaybinta lagu saleeyo ku lug lahaanshaha bulshada taasoo bixin doonta nidaam xaqsoor oo ka hor imanaya doorarka awoodeed, mudnaanta gaarka ah iyo cunsuriyada—ay soo saareen Guddiga Ka Talabixiya Tallaalka COVID-19 (VAC) ee mar dhow la isku keenay.

Iyadoo la adeegsanayo qaabdhismeed xaqsoor ah, OHA waxay u qaybin doontaa tallaalka COVID-19 si waafaqsan habka weji-wejiga ah ay ku taliyeen Guddiga Talabixinta Tallaalka (ACIP) ee Xarunta Xakameynta iyo Kahortagga Cudurrada (CDC). Halkan ka eeg cidda u-qalanta: https://govstatus.egov.com/OR-OHA-COVID-19

S9: Waxaa horey iigu dhacay COVID-19 waana ka bogsaday. Weli ma inaan qaataa tallaalka COVID-19 marka la heli karo?

J9: Maadaama heerarka jeermis la derisyada ay hoos u dhacaan kadib caabuqa dabiiciga ah, waxaa hadda lagu talinayaa in dadka jirrada qaba la tallaalo si loo xoojiyo jawaab-celinta difaaca jirka loona siiyo difaac muddo dheer ah. Qofkii laga helaa COVID-19 welina leh astaamo waa inuu sugaa dhammaadka muddada go'doonka (10 maalmood, ama 20 maalmood) si loo helo tallaalka si looga fogaado qaadsiinta cudurka qofka tallaalka bixinaya. Kuwa helay daawada jeermis la deriska shaybaarka lagu sameeyay ee lagu daaweeyo COVID-19 waa inay sugaan 90 maalmood oo buuxda si ay u helaan tallaalka.

S10: Weli miyay tahay inaan sii wado xirashada maaskarada iyo inaan ku dhaqmo ka-fogaanshaha dadka kadib markaan helo tallaalka COVID-19?

J10: Haa. Tallaalku waa wax muhiim ah oo lagu soo afjarayo safmareenkan aan horay loo arag balse ilaa iyo inta dadka laga tallaalayo waa inaan qaadnaa xeeladaha caafimaadka dadweynaha ee la caddeeyey oo ay ka mid yihiin ka-fogaanshaha dadka, gacmo-dhaqashada wanaagsan, iyo ku xirashada afxirka bulshada dhexdeeda si loo yareeyo halista gudbinta iyo si loo ilaaliyo bulshadayada.

S11: Halkee ayaan ka heli karaa warbixin dheeraad ah oo ku saabsan tallaalada COVID-19?

J11: Macluumaadka la xiriira badqabka, isku xigxiga, diiwaangelinta bixiyaha ee loogu talagalay bixinta tallaalada iyo wax badan oo kale waxaa laga heli karaa mareegta tallaalka COVID-19 ee OHA https://covidvaccine.oregon.gov/

U-qalmida

S1: Sideen ku ogaadaa inaan xaq u leeyahay inaan is tallaalo iyo in kale?

J1: Booqo https://getvaccinated.oregon.gov si aad u isticmaasho aaladda Is-tallaalka ee Oregon. Waxaa loogu talagalay inay kaa caawiso inaad fahanto haddii aad xaq u leedahay. Waxaad ubaahantahay inaad isdiiwaangaliso si aad uhesho wararka ku saabsan fursadaha tallaalka. Haddii aad u baahan tahay caawimaad inaad iska diiwaangeliso, weydii qof inuu ku caawiyo ama la xiriir 211:

- Qor ORCOVID oo kudir 898211
- Iimayl ORCOVID@211info.org
- Wac 211

Waa kan liiska cidda hadda heli karta tallaalka.

S2: Waxaan ka shaqeeyaa dugsi ama xarunta daryeelka ilmaha, goormaan heli karaa tallaalka?

J2: Bixiyeyaasha daryeelka ilmaha, bixiyeyaasha waxbarashada hore, macallimiinta K-12 iyo shaqaalaha dugsi ee Oregon ayaa u-qalma in la tallaalo hadda.

S3: Goorma ayaa dadka 65 jirka ah ama ka weyn la tallaali karaa?

J3: Qof kasta oo 65 sanno jir ah ama ka weyn waa la tallaali karaa hadda. Wixii liiska buuxa ee cidda u-qalanto tallaalka iyo goorta, booqo: https://covidvaccine.oregon.gov/.

Weli waxaa ka jira tallaal xaddidan gobolka, wayna adkaan kartaa in ballan tallaal la helo balse fadlan sii wad isku dayga.

Haddii aad caawimaad u baahan tahay:

- Qor ORCOVID oo kudir 898211
- Iimayl ORCOVID@211info.org
- Wac 211

S4: Haddii hal lammaane u-qalmo tallaal (tus., shaqaalaha waxbarashada, dadka waayeelada ah, bixiye caafimaad daryeel) miyuu lammaanaha kale aan buuxinin shuruudaha u-qalmida sidoo kale qaadan karaa tallaalka?

J4: Maya. Weli way xaddidan yihiin tirada tallaalada, sidaas darteed kaliya kuwa qeybta ka ah wajiga ay u-qalmaaan ayaa awoodi doona inay helaan tallaalada.

S5: Deegaankeyga joogtada ah wuxuu ku yaalaa gobol kale, laakin Waxaan daganahay Oregon (arday, guryo badan, la joogida qoyska, iwm.). Goortii ay tahay tookadeyda, miyaan tallaalka ka heli karaa gudaha Oregon?

J5: Haddii aad hadeer dagantahay Oregon oo aad buuxisid shuruudaha u qalmida tallaalka ee Oregon waxaad ka heli kartaa tallaaka gudaha Oregon.

S6: Miyaa dadka ka shaqeeya Oregon laakin ku nool gobol xaduud la leh Oregon lagu tallaali karaa gudaha Oregon?

J6: Haddii aad ku nooshahay gobol xaduud la leh Oregon waxaa ujeedooyinka qoondeynta tallaalka awgood laguugu daray dadweynaha gobolkaas oo waa inaad ka heshaa tallaalkaaga gobolka aad ku nooshahay, ma ahan gobolka aad ka shaqeysid. Si kastaba ha noqotee, haddii aad u qalantid tallaalka Oregon shaqadaada awgeed – tusaale ahaan haddii aad tahay shaqaalaha daryeelka caafimaad ee isbitaal ku yaalo Oregon ama aad macalin ka tahay dugsiga K-12 ee Oregon, waad heli kartaa oo waa in tallaalka aad ka heshaa badroonigaaga ama tallaalka guud ama rugaha caafimaadka bulshada Oregon.

S7: Miyaan u baahannahay in la iga tallaalo isla degmada aan ku noolahay? Ama aan ka shaqeeyo?

J7: Haddii aad u-qalantid inaad hesho tallaal, waxaa laguugu dhiirogelinayaa in lagaa tallaalo degmada aad ku nooshahay, balse waxaad ka heli kartaa tallaalka degmo walba oo ku taalo Oregon.

Qaadashada tallaalkaaga:

S1: Goorma ayaa la i tallaalayaa?

J1: Tallaaladu weli way yar yihiin balse ugu dambayntii way ku filnaan doonaan qof kasta oo doonaya mid. Waqtigan la joogo, goobaha tallaallada bixinaya waxaa ka mid ah maamulka caafimaadka bulshada ee deegaanka ama la-hawlgalayaashooda, isbitaallada iyo munaasabadaha tallaal. Marka tallaalka tallaalku sii kordho, waxaa laga yaabaa inaad ka tallaasho meelo kale. Hada, sahayda oo xadidan awgood, bixiyahaaga daryeelka aasaasiga ah (xafiiska dhakhtarkaaga) uma badna inuu heli doono talaal. Waxaad sidoo kale wararka ku saabsan dhacdooyinka tallaalka ka maqli kartaa. Dhacdooyinkaani waxay yeelan doonaan waddo aad ballan uga samaysato tallaalkaaga.

S2: Bukaannada ku jira isbitaal kuwaasoo hadda u-qalma Wajiga 1a ama 1b ma heli karaan tallaalka bukaan-jiif ahaan?

J2: Haa, bukaannada waxaa laga yaabaa in lagu tallaalo isbitaalka, hase yeeshe, inta badan isbitaalada iyo nidaamyada caafimaadka ayaa haatan helin qoondeyn tallaal ujeedkan awgiis. Inta badan qoondeynta tallaalka ee isbitaalada iyo nidaamyada caafimaadka waxaa loogu talagalay munaasabadaha bulshada waana inaan loo isticmaalin inay mudnaanta siiyaan bukaannadooda. Waxa kaliya ee ka reeban waa isbitaalada dhimirka qaarkood oo ay ku jiraan Isbitaalka Gobolka Oregon ee helay tallaalada loogu talagalay bukaan-socodkooda sababtoo ah waxay yihiin goobo daryeel oo la isugu imaado. Haddii isbitaalku tallaalo bukaan la seexiyay xaruntooda, waa inay hubiyaan bukaanka, markuu baxayo, inuu ballan qabsaday uu ku qaato tallaalka labaad.

S3: Miyay isbitaalada/nidaamyada caafimaad talaali karaan bukaannada ay ugu adeegaan si bukaan-socod ah?

J3: Haa, isbitaalada iyo nidaamyada caafimaad waxay ka ahaayeen wadahawlgaleyaal muhiim ah dadaalada talaalka gobolka ee COVID-19. Si kastaba ha noqotee, isbitaalada iyo nidaamyada caafimaadka waa inaysan u isticmaalin tallaalka loo qoondeeyay munaasabadaha bulsheed hab qaab siinaya mudnaan bukaankooda (tus., munaasabadaha xiran ama fursadaha mudeynta gaarka ah). Isbitaalada iyo nidaamyada caafimaadka waxaa lagu dhiirigelinayaa inay si toos ah ugu xiraan bukaanadooda iyo xubnahooda madallada iyo munaasabadaha sida cad looga heli karo tallaalka COVID-19.

S4: Ma la iiga baahan yahay inaan soo qaato aqoonsi (ID) si aan u caddeeyo u-qalmitaankayga?

J4: Uma baahnid dukumiinti ama aqoonsi gaar ah si loo caddeeyo u-qalmitaanka. Bixiyeyaasha tallaalka laftoodu waxay kaaga baahan karaan inaad ku dhawaaqdo, iyadoo loo marayo ku dhawaaqis hadal ah ama qaab kale, inaad ku jirto koox u-qalmata kahor inta aysan helin tallaalka. Waxaa lagaa codsan karaa macluumaadka caymiska, inkastoo tallaalku yahay bilaash, laguma weydiin karo inaad jeebkaaga ka bixiso khidmadda durista tallaalka. Waxaad heli doontaa caddeyn ah in lagu tallaalay; ha lumin kaarka lagu siiyay.

S5: Ma u baahanahay inaan bixiyo lambarka badbaadada bulshada si aan u ballansado ballanta tallaalka?

J5: Maya. Haddii lagaa codsado lambarka bulshada amniga/ badqabka inta lagu jiro hawsha jadwalka ballanta, uma baahnid inaad mid dhiibto oo su'aashaas oo madhan ayaad ka tagi kartaa.

S6: Immisa ayaan bixin doonaa si aan u qaato tallaalka COVID-19? Tallaalku ma lacag la’aan baa?

J6: Tallaalada COVID-19 waa kuu bilaash. Uma baahnid caymis caafimaad. Haddii aad leedahay caymis caafimaad, bixiyayaasha tallaalku waxa dhici karta inay shirkadda caymiskaaga ku dallacaan khidmadda siinta tallaalka. Tani waxay ka dhigan tahay in lagu weydiin karo macluumaadka caymiskaaga markaad

qaadaneyso tallaalka COVID-19. Talaal bixiyaasha kuma soo dallaci *karaan* tallaalka ay ku siinayaan, laakiin waxaa muhiim ah inaad la timaaddo macluumaadkaaga caymiska haddii aad caymis caafimaad leedahay.

S7: Waxaan ubaahanahay caawimaad sidii aan ku tagi lahaa rugta talaalka. Ma la i siin karaa gaadiid aan tallaal ku helo? Sideen ku diyaarin karaa taas?

J7: Haddii aad xubin ka tahay Qorshaha Caafimaadka Oregon oo aad u baahan tahay raacitaan si aad u hesho tallaal, raacitaanadu waa bilaash. Raadi adeegyada raacitaanka OHP ee deegaankaaga. Waxaad sidoo kale wici kartaa qorshahaaga CCO.

Haddii aad tahay waayeel ama qof weyn oo naafonimo jireed qaba, waxaa sidoo kale ka jiri kara adeegyo kale bulshadaada oo kaa caawin kara gaadiid-raaca. Si aad wax badan u ogaato, la xiriir Isku Xirka Dhigaalada Waayeelka iyo Dadka Laxaadka La' ee Oregon (ADRC) si aad u ogaato gaadiidka bulsheed iyo adeegyada kale ee la heli karo si ay kuu caawiyaan: 1-855-ORE-ADRC ama https://www.adrcoforegon.org/consumersite/index.php

Haddii aad ka hesho adeegyada aad ku hesho gudaha guriga adoo u maraya Waaxda Adeegyada Dadweynaha ee Oregon (ODHS) Xafiiska Waayeelka ah iyo Dadka Laxaadka La' (APD), waxaad ka codsan kartaa bixiyahaaga adeegga guriga ee Medicaid maalgeliyaan inuu kuu wado rug caafimaad oo kula joogo rugta caafimaadka.

Dhigaalada kale ee maxalliga ah ayaa sidoo kale la heli karaa. Weydii adeegga gaadiidka aad caadiyan u isticmaasho ballamaha dhakhtarka inay hayaan gaadiid lagu aado tallaalada.

S8: Ma inaan saf ku sugaa tallaalka?

A8: Goobo iyo musaabado badan oo tallaal ayaa ku weydiin doona inaad horay isu-diiwaangeliso si ay si ammaan ah ugu maareeyaan qulqulka bukaannada si looga fogaado safafka. Goobaha waaweyn ee tallaalka ayaa sidoo kale ka shaqeynaya sidii loo hubin lahaa in goobahooda ay u furan yihiin waayeelka iyo dadka naafada ah, gaar ahaan kuwa leh arrimaha dhaqdhaqaaqa. Laakiin sidoo kale waa inaad sugto. Haddii sugitaanka safka ay kugu adkaan doonto, waa inaad ogeysiisaa goobta tallaalka inaad u baahan tahay hoy.

S9: Ka waran haddii uu igu dhaco COVID-19 kadib tallaalkaygii koowaad?

J9: Haddii aad baylah u noqoto COVID-19, waa inaad raacdaa tilmaamaha caafimaadka dadweynaha oo aad guriga joogtaa 14 maalmood xitaa haddii aad qaadatay tallaalkaaga koowaad.

S10: Muddo intee le'eg ayaan u baahanahay in la i indha-indheeyo kadib markii la i tallaalo? Ka waran haddii aan taariikh xasaasiyadeed leeyahay?

J10: Dadka leh taariikhda falcelinta xasaasiyadeed ee degdega ah ee nooc kasta uga daro tallaalka ama daawada la isku duro iyo dadka leh taariikh xasaasiyad

sabab kasta ha noqotee waa in la indha-indheeyaa muddo 30 daqiiqo ah. Dhammaan dadka kale waa in la indha-indheeyaa muddo 15 daqiiqo ah. Tani waxay ka dhigan tahay inaad u baahan tahay inaad sugto halka aad ka qaadatay tallaalka si tallaal-bixiyuhu kuu ilaaliyo si uu u hubiyo inaad fiicantahay.

S11: Goorma ayaan qaataa qiyaasta labaad ee tallaalka COVID-19? Sidee ayaan u xusuusan doonaa?

J11: Tallaalka Pfizer iyo Moderna labaduba waa in laga qaataa laba qiyaasood si sare loogu qaado falcelinta buuxda ee habdhiska difaaca jirka. Qiyaasta labaad ee tallaalka Pfizer waa in la qaataa 21 maalmood kadib qiyaasta koowaad, tallaalka Moderna waa in la qaataa 28 maalmood kadib qiyaasta koowaad. Shakhsiyaadka ayaa kubiri kara VaxText, oo ah barnaamij CDC ah oo u diri doona bukaanka qoraal marka la joogo qaadashada tallaalka xiga. Qaar ka mid ah bixiyeyaasha tallaalka ayaa waliba kuu soo diri kara xusuusin.

S12: Ka waran haddii aan xasaasiyad ka qaado tallaalkayga COVID-19?

J12: Badqabka ayaa leh mudnaanta koobaad. CDC iyo FDA waxay ku dhiirrigelinayaan dadweynaha inay u soo sheegaan waxdhimaalada suurtagalka ah (loo yaqaano dhacdooyinka xun) Nidaamka Ka Warbixinta Dhacdada Xun ee Tallaalka (VAERS). Nidaamkan qaran wuxuu ururiyaa xogtaan si loo ogaado dhacdooyinka xun ee lama filaanka ah, u muuqdaan inay u dhacaan marar badan si ka duwan sidii la filayay, ama u dhacaan si isxigxiga oo aan caadi aheyn. Wax ka ogow farqiga u dhexeeya waxyeellada tallaalka iyodhacdada xun. Warbixinnada VAERS waxay ka caawinayaan CDC la socoshada badqabka tallaallada..

S13: Yaan u wacayaa haddii aan leeyahay dhibaatooyin soo raaca: goobta tallaalka ama daryeel caafimaad bixiyahayga koowaad?

J13: Haddii aad ka cabanayso saamayno xun kadib markii aad ka baxday goobta tallaalka, waa inaad la xiriirto bixiyahaaga daryeelka caafimaad ama aad tagto xarunta daryeelka degdegga ama gurmadka ah. Haddii ay tahay xaalad degdeg ah, waxaad aadi kartaa daryeel degdeg ah ama xarun degdeg ah. Waxaad sidoo kale uga warbixin kartaa dhibaatooyinkaaga dhinaca CDC adoo adeegsanaya barnaamijka vsafe.cdc.gov.

S14: Horaan ayaan u qaatay qiyaastayda koowaad ee tallaalka COVID-19. Halkee ayaan ka helaa qiyaasta labaad?

J14: Waa inaad ka heshaa qiyaastaada labaad ee tallaalka COVID-19 isla goobta aad ka heshay qiyaastaaada koobaad, in bixiyaha tallaalka uu meel kale kuu diro mooyee.

S15: Haddii aan ka qaato qiyaastayda ugu horreysa ee tallaalka gudaha Oregon, miyaan ka heli karaa qiyaasta labaad gobol kale?

J15: Waxaan kugu dhiirigalineynaa inaad ka qaadatid tallaalkaaga labaad isla goobti hore. Haddii aad u baahan tahay inaad iska tallaasho gobol kale, waa inaad keentaa dukumiinti sheegaya inaad qaadatay tallaalkii ugu horreeyay taasoo

muujineysa tallaalka lagu siiyay. Qofka ku tallaalaya waa inuu ku qoraa labada qiyaasoodba Nidaamka Macluumaadka Tallaalka ee Oregon (ALERT IIS).

S16: Waxaan haystaa daryeel-bixiye iga caawiya baahiyahayga daryeelka caafimaad iyo ballamaha dhakhtarka. Miyuu sidoo kale is-tallaali karaa hadduu i soo raaco?

J16: Haddii daryeelahaagu ku bixiyo adeegyo gudaha guriga, isaguna sidoo kale waa la tallaali karaa. Haddii kale, daryeel-bixiyahaagu waa la tallaali karaa haddii ay hoos yimaadaan shuruudo kale oo u-qalmasho. Waxaad booqan kartaa halkan si aad u ogaato u-qalmitaanka: https://sharedsystems.dhsoha.state.or.us/DHSForms/Served/li3527A.pdf

Qeybinta tallaalka ee Oregon

S1: OHA ma u soo daabici doontaa macluumaadka tallaalka si joogto ah, si la mid ah sida aad si cad u soo sheegtaan tirada baaritaannada, kiisaska cusub iyo dhimashada ka dhalata COVID-19?

J1: Haa, OHA waxay ku soo sheegi doontaa xogta tallaalka iyo tallaalida gudaha mareegta tallaalka COVID-19. Waxaad ka heli kartaa xaqiiqooyinka ku saabsan tallaalada COVID-19 waxaadna kala socon kartaa horusocodka Oregon barta https://covidvaccine.oregon.gov.

S2: Tallaalada COVID-19 ma u baahan doonaan keyd khaas ah?

J2: Tallaallo badan, sida tallaalka Moderna, waxay u baahan yihiin qabow aan kala go' lahayn oo caadi ah oo ku lug leh qaboojin ama barafeyn aasaasi ah. Tallaalka J&J waxaa lagu keydiyaa firintijeerka. Tallaalka Pfizer wuxuu u baahan yahay qabow aan kala go' lahayn oo sare iyadoo la isticmaalayo qaboojiye khaas ah oo tallaalka ku haya heerkul dhan -60 ° ilaa -80 ° Selsiyas (-76° to -112° Fahranhayt). Oregon waxay leedahay tiro kooban oo qaboojiyayaashaan ah, inkastoo isbitaalada iyo jaamacadaha qaarkood ay leeyihiin. Baakadaha tallaalka waxaa laga buuxin karaa jababka barafka qallalan oo u oggolaan kara tallaalka in la keydiyo ilaa 30 maalmood iyadoo aan la isticmaalin qaboojiye khaas ah oo heerkulkiisa ebar ka hooseeyo.

S3: Ma iibsaneysaa qaboojiyeyaasha keydinta ee heerkulka aadka u hoose leh?

J3: Horraantii Janaayo, OHA waxay heshay 15 qaboojiyeyaasha keydinta ah ee heerkulka aadka u qabow leh, oo yaryar, la qaadi karo si loo kordhiyo ku keydinta tallaalka Pfizer goobaha kale ee aan isbitaalka ahayn ama gudaha bulshada aan haysan kheyraadka ama u baahan inay iibsadaan qayboojiye iyaga u gaar ah. Dhammaan cutubyada waa la qaybiyey oo hadda OHA ma qorsheyneyso inay wax badan iibsato. Waxaan eegaynaa sawirka guud ee qeybinta tallaalkas, oo ay ku jiraan tallaallada aan u baahnayn qabow aad u sareeya. Waxaan rajeyneynaa qoondeynta dawladda ee tallaalada kala duwan in isbeddelkeeda sii socdo waxaana kala shaqeynaynaa wadahawlgaleyaashayada inaan joogteyaan dabacsanaanta nidaamyada qeybinta si aan awood ugu yeelano inaan hubino ka

helitaanka tallaalka COVID-19 guud ahaan Oregon iyadoo aan loo eegin nooca tallaal ee la heli karo.

S4: Yaa mas'uul ka ah hubinta in tallaalada si siman loogu qaybiyo iyo kuwa u-qalma sida ku cad qorshaha qeybinta gobolka?

J4: Qeybinta tallaalada Oregon waxaa maareeya Maamulka Caafimaadka Oregon, iyagoo la tashanaya Xafiiska Gubanatooraha.

CDC waxay OHA kala talisaa qoondeynta toddobaadlaha ah ee loo heli karo Oregon. Tani waxay ku saleysan tahay nidaam saami ah oo ay ku jiraan tirada dadweynaha ee u baahan marka loo eego qeybta halista. Wixii Oregon ah, waa qiyaas dhan boqolley 1.21 ah. OHA waxay dalab u gudbisaa CDC si ay si toos ah ugu soo raraan bixiyeyaasha tallaalka. Shixnadaha waxay ku saleysan yihiin bixiyeyaasha dadweynuhu u adeegi karaan iyo mugga firintijeerka/qaboojiyaha la heli karo. Tallaalada waxaa si toos ah loogu geeyaa bixiyeyaasha iyadoo la adeegsanayo ururada geynta ee qandaraaska kula jiraan CDC.

Tallaalka waxaa si toos ah looga soo raraa soosaareyaasha shirkadaha ku sugan Oregon. Bixiyeyaasha waxay kala socon karaan shixnadahooda Oregon ALERT IIS (Nidaamka Macluumaadka Tallaalka).

S5: Waa maxay maamuuska bixiyeyaasha tallaalka looga baahan yahay inay raacaan mar haddii weelka daawada la furo oo ay jiraan qiyaaso haray?

J5: Dadka keenaya tallaalada waa inay u geeyaan dadka hadda u-qalma wejiga la marayo ee bixinta talaalka. Bixiyeyaashu waa inay tallaalka sii qorsheeyaan iyagoo adeegsanaya aqoontooda iyo khibradooda ay u leeyihiin rugaha caafimaadka tallaalka ilaa maanta. Iyadoo ku xiran khibradda, qabanqaabiyeyaasha rugta caafimaadka waa inay tixgeliyaan qabashada ballamo badan iyadoo lagu saleynayo tirooyinka caadiga ah ee maqnaanshaha. Goobaha qaarkood waxay qoraan liiska wicitaanka ee shaqsiyaadka u-qalma ee doonaya inay ku yimaadaan muddo gaaban tallaalka. Haddii aysan jirin shakhsiyaad u-qalma oo la heli karo in la tallaalo, iyadoo dadaalka ugu fiican lagu bixiyay qorsheynta goobta tallaalka, bixiyeyaashu waa inay ku bixiyaan tallaalka meel u dhow, si looga fogaado in la khasaariyo wax tallaal ah.

Faahfaahino ku saabsan tallaalka

S1: Uur ayaan ahay. Ma qaadan karaa tallaalka COVID-19?

J1: CDC ma hayso wax xogta badqabka COVID-19 ee haweenka uurka leh, inkastoo daraasaadka xayawaanka iyo bina’aadamka socdaan ayna in badan qorshaysan yihiin in la bilaabo Janaayo 2021. Tallaalada mRNA ma ahan tallaalo “fayras nool” ah. Haddii haweeney ka mid tahay koox (tus., shaqaalaha daryeelka caafimaadka) lagula taliyay inay qaataan tallaalka COVID-19 ay uur leedahay, way dooran kartaa inay qaadato tallaalka iyadoo la kaashanaysa caawimaada bixiyaha daryeelkeeda caafimaad si ay u qaadato go'aan laga warqabo. Waxyaabaha la tixgelinayo:

- Heerka COVID-19 ee bulshada iyo halista ugu jirto isqaadsiinta
- Halista shaqsiyeed ee qaadida COVID-19 (shaqo ama hawlo kale)
- Halista COVID-19 ee iyada ama uur-jiifkeeda u leeyahay
- Waxtarka tallaalka
- Waxdhimaalada tallaalka
- La'aanta xog ku saabsan tallaalka xilliga uurka
- Haweenka qaata tallaalka oo qandho ku dhacdo waxdhimaal ahaan waa inay qaataan acetaminophen (Tylenol)
- Baaritaanka joogtada ah ee ka hor uurka tallaalida laguma talinayo

S2: Miyaa tallaalladu la isweydaarin karaa?

J2: Maya, tallaaladu isku mid ma ahan. Tallaalada Pfizer iyo Moderna aad ayay isku mid u yihiin. Labaduba si isku mid ah ayay waxtar u leeyihiin oo u joojiyaan faafida fayraska si isku mid ah, markaa dadku waa inay qaataan hadba midka ay heli karaan. Laakiin qiyaastaada labaad waa inay tahay isla nooca tallaalka ee qiyaastaada koowaad.

Tallaalka J&J waa hal qiyaas oo keliya, marka haddii aad qaadatay, gebi ahaanba waa lagu tallaalay mana ahan inaad qaadato qiyaas labaad oo tallaalkan ah ama tallaal kale ah.

S3: Tallaalka COVID-19 ma yahay fayras nool?

J3: Maya, midkoodna saddexda tallaal ee COVID-19 ee la oggolaaday ma ahan fayras nool.

S4: Tallaalka Pfizer miyuu sii ahaan doonaa mid heerkulkiisa qabow yahay marka qofku la isku durayo? Mise waa la diirin doonaa?

J4: Tallaalka waa la qasi doonaa oo waxaa lagu keydin doonaa qaboojiyaha ama heerkul qoleed ilaa lix saacadood kahor tallaalida.

S5: Maxay yihiin waxyeellada tallaalka COVID-19?

J5: Sida laga soo xigtay FDA, waxyeellada ugu badan ee lagu ogaaday tijaabooyinka tallaalka COVID-19 waxaa ka mid ah xanuun, guduudasho ama bararka goobta duriinka, daal, madax-xanuun, qarqaryo, murqo-xanuun iyo kalagoysyo xanuun. Ka dib markaad hesho tallaalka COVID-19, waxaad u badan tahay inaad yeelaneyso gacan xanuun leh. Waxaa laga yaabaa inaad yeelato murqo xanuun, kalagoys xanuun, daal, madax xanuun, dhaxan, ama qandho. (Qandhadu ma badna.) Tani waxay inta badan ka dhigan tahay inuu tallaalku shaqeynayo si uu jirkaagu u caafimaado. Kuwani waa calaamado caadi ah oo muujiya in jirkaagu dhisayo difaac. Mararka qaarkood waxyeelooyinkaan waxay kaa joojin karaan inaad sameyso howlahaaga caadiga ah dhowr maalmood. Dhibaatooyinkan badankood waa inay baaba'aan maalmo gudahood.

S6: Miyuu qof qaadan karaa tallaalka COVID-19 isagoo jirran?

J6: Kuwa leh jirro yar waxaa laga yaabaa inay qaataan tallaalada iyagoo wax saameyn ah ku yeelaneyn badqabka iyo waxtarka tallaalka. Si kastaba ha noqotee, dadka qaba COVID-19, fadlan suga ilaa dhammaadka muddada go'doomintaada, taasoo la micno ah 10 maalmood ama ka badan oo ku xiran goorta aad ka bogsato astaamahaaga, kahor inta aadan qaadan tallaallada si aad uga ilaaliso inuu cudurkaaga ku faafo shaqaalaha daryeelka caafimaadka ee tallaalka bixinaya.

S7: Ma yihiin labada qiyaas ee tallaalka COVID-19 isku qaddar? Qiyaasta labaad ma ka yar tahay ama ka badan tahay qiyaasta koowaad?

J7: Labada qiyaas ee tallaalka Pfizer iyo Moderna waa isku qaddar. Qiyaasta tallaalka Pfizer ma ahan mid la mid ah qiyaasta tallaalka Moderna.

S8: Ma qaadan karaa tallaallo kale isla waqtiga tallaalkayga COVID-19?

A8: Keliya si aad ammaan u ahaato, CDC waxay kugula talineysaa inaad sugto laba toddobaad kadib markaad qaadatay tallaallo kale ka hor intaadan qaadan tallaalka COVID-19. Mar alla markaad qaadato tallaalkaaga COVID-19, waa inaad sugtaa laba toddobaad kahor intaadan tallaalada kale qaadan.

Maadaama dad badan aysan awoodi doonin inay isla markiiba qaataan tallaalka COVID-19, hadda ayaa ah xilli ku habboon in la qaato tallaalada kale ee laga yaabo in waqtigooda la joogo, sida tallaalka hargabka, tallaalka teetanada ama tallaalka dildillaaca maqaarka.

Xagee u aadi karaa macluumaad dheeri ah?

- Booqo https://covidvaccine.oregon.gov.
- Qoraal ORCOVID ugu dir 898211 si aad u hesho cusbooneysiin qoraal / SMS ah (Ingiriis iyo Isbaanish keliya).
- Iimayl ORCOVID@211info.org.

Haddii aadan heli karin tallaalka COVID-19 su'aashaada waxaa looga jawaabayaa https://covidvaccine.oregon.gov, qoraal ahaan, ama iimayl ahaan, ka wac xarunta wicitaanka 211 ama 1-866-698-6155. Waxay furantahay laga bilaabo 6-da subaxnimo illaa 7-da fiidnimo maalin walba, oo ay ku jiraan fasaxyada.

- Wakhtiyada sugitaanku way dheeraan karaan maadaama ay wicitaanada fara badan yihiin. Waxa jira ikhtiyaar ah in dib laguu soo waco beddelkii aad sugi lahayd.
- Ingiriska iyo Ispanishka ayaa looga hadlaa xarumaha wicitaanka. Tarjumaad bilaash ah ayaa loo heli karaa luuqadaha kale oo dhan.
- TTY: La hadal 711 ama wac 1-866-698-6155.

Helitaanka dukumiintiga: Wixii shakhsiyaadka naafada ah ama shakhsiyaadka ku hadla luuqad aan aheyn Ingiriisi, OHA waxay ku bixin kartaa warbixinta qaabab kale sida fasiraadaha, daabacadda balaaran, ama farta indhooleyaasha. Kala xiriir Xarunta Macluumaadka Caafimaadka 1-844-882-7889, 711 TTY ama COVID19.LanguageAccess@dhsoha.state.or.us.